Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Portland Waxay Ansixiyeen Qaraar ku Xaqiijinaya

Ilaalinta Xuquuqda Ardayda aan Sharciga Lahayn ee Degmada

Qaraarku wuxuu sidoo kale tilmaamayaa qorshe shaqaalaha loogu tababarayo hawlaha Laanta Socdaalka iyo Xoojinta Furdadaha(ICE) ee dugsiga

Iyadoo ay caddeyn u tahay balanqaadkeedii ahaa bixinta badbaadada jirka iyo fayo-qabka dhanka niyada ee dhammaan ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha Portland, Guddiga Waxbarashada waxay Khamiistii, Noofambar 17-keedii waxay taxadar leh iskula gorfeeyeen isla markaana si buuxda u ansixiyeen qaraar kala caddaynayay nidaamyada u yaala degmada ee la xiriira hawlaha Dhaqangelinta Xakamaynta Socdaalka (ICE) ee dugsiyada PPS.

Qaraarka Tirsigiisu yahay No. 5363 wuxuu sidoo kale Guddoomiyaha Waxbarashada ee Ku-meel-Gaarka farayaa in uu 90ka maalmood ee soo socda dejiyo qorshe loogu talagalay tababarka dhamaan shaqaalaha muhiimka ah ee PPS kaasi oo ku saabsan sida loogu jawaabayo shaqaale kasta oo ka tirsan ICE ee codsanaya macluumaadka ku saabsan ardayda PPS iyo qoysaska, ama isku dayaya in ay soo galaan dhisme ay leedahay PPS. Iyadoo la isku duwayo dadaalkani ilaa heer degmo, macalimiinta iyo shaqaalaha dugsigu waxay si fiican u awoodi doonaan in ay muhiimada siiyaan waxbarashada ardaydeena. Qorshahan waxaa la gaarsiin doonaa dhammaan qoysaska PPS isagoo ku qoran dhammaan luqaddaha la taageerayo. Qorshaha maamuluhu wuxuu ka hadli doonaa sida loo taageerayo ardayda ay xubnaha ka tirsan qoysaskoodu ay barakaceen iyadoo ay ugu wacan tahay Laanta Socdaalka iyo Xoojinta Furdadaha(ICE).

“Ka dib doorashadii Madaxtinimada Madaxweynaha iyo hadalada kulul ee ku xeeran, waxaa jiray walwal iyo walaac aad ah oo ku saabsan xasiloonida qoyska iyo badbaadada guud ahaan bulshadeena,” ayay sheegtay Agaasimaha Guddiga PPS Julie Esparza Brown. “Waxaan maanta tallaabadan u qaadaynaa in aan fariin u dirno dhammaan qoysaska PPS iyadoo aan loo eegayn asalkooda ama xaaladdooda, Degmadani waxay samayn doontaa wax kasta oo karaankeeda ah si ay u ilaaliso carruurta oo dhan iyo qoysaskooda ka tirsan dugsiyadeena.”

Qaraarku wuxuu farayaa:

· Shaqaalaha Laanta Socdaalka iyo Xoojinta Furdadaha(ICE) in ay si shakhsi ahaana, u ogaysiiyaan Guddoomiyaha Waxbarashada iyo Qareenka Sare, ka hor intaanay galin dhisme ay leedahay PPS si loo qaadi karo tallaabooyin ardaydeeda iyo shaqaalaheeda lagu siinayo badbaado dhanka niyada iyo jirka ah.

· Shaqaalaha Laanta Socdaalka iyo Xoojnta Furdadaha (ICE) in ay keenaan amar qoraal ah oo ka socda ICE oo tilmaamaya in ay galaan dhisme ay Degmadu leedahay iyo waxa ay tahay ujeedada ay u rabaan inay u galaan.

· Dejinta nidaamyo la raacayo oo loogu talagalay in qoysaska lagu ogaysiiyo dadaalada ay wado Laanta Socdaalka iyo Xoojinta Furdaduhu(ICE) ee ay ku doonayso in ay ku hesho macluumaad ku saabsan ardayda iyo qoysaska

Qoraalka Qaraarka oo dhammaystiran Tirsigiisu yahay No. 5363 waa sida soo socota:

QARAARKA tirsigiisu yahay No. 5363 Xuquuqda Ardayda aan Sharciga Lahayn iyo Nidaamyada loogu talagalay Dhaqangelinta Laanta Socdaalka iyo Xoojinta Furdadaha (ICE) ee Gelidda Dugsiyada

WARBIXINO FAAHFAAHSAN

A. Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an in ay guuleystaan arday kasta oo ka tirsan dugsiyadeena. Hawsha Dugsiyada Dadweynaha Portland waa in dhammaadka dugsiga hoose, dhexe, iyo sare, uu arday kastaa magac ahaan uu buuxin doono ama dhaafi doono heerarka waxbarasho ee la dejiyay si buuxdana ugu diyaar garoobi doono in uu gaaro go'aano noloshiisa la xiriira oo wax ku ool ah. Waxaan aaminsan nahay in arday kastaa leeyahay awoodii uu ku gaari lahaa meesha uu rabo, waana mas'uuliyada dugsiga degmadeena in arday kasta siiyaan fursad iyo taageero si uu u buuxiyo in uu gaaro awoodda ee leeyahay ee ugu saraysa.

B. Guddigu waxay aaminsan tahay in badbaadada jireed iyo fayo-qabka dhanka niyada ee carruurteena ka tirsan Degmadda, iyo iyadoo loo xaqiijinayo in dugsiyadeenu yihiin kuwo ammaan ah iyo soo dhawaynta dhammaan ardaydeena iyo qoysaskeena ay muhiim u tahay in ardaydu awoodaan in ay meel gaaraan. Dugsiyda Dadweynaha Portland(PPS) uma dulqaadato nooc kasta oo takoorid ah, dhibaatayn ah ama xoog ku muquunin ah (4.30.060-P Siyaasadda Dhibaataynta-Lagaga soo Horjeedo).

C. Jawigan ammaanka ah ee soo dhaweynta leh carqalad ayaa ku imaan karta iyadoo ay ugu wacan tahay joogitaanka ay joogaan Saraakiisha Laanta Socdaalka iyo Xoojinta Furdadaha(ICE) ee yimaada dhisme ay leedahay PPS iyadoo ujeedadu tahay in ay meesha ka kexeeyaan ardayda ama xubnaha ka tirsan qoysaskooda, ama helaan macluumaad ku saabsan ardayda iyo qoysaskooda.

D. Guddigu waa intaasi dheer oo ay aamnisan tahay in kartida ardaydeenu u leedahay ay meel ku gaaraan ay raad ku xun ku yeelan doonto kaxaynta xubnaha ka tirsan qoysaskooda la kaxaynayo inta lagu guda jiro weerarka ay wado Laanta Socdaalku(ICE) kaasi oo ardayga ka dhiga in aanay yeelanin dad waaweyn oo kor kala socda xaalkooda si ay u daryeelaan, iyo in Degmaddu ay lahaato siyaasaddo iyo nidaamyo la raacayo oo u dejisan si loo ilaaliyo sidoo kalena loo daryeelo ardayda noocan oo kale ah ilaa ma'suul ama qof weyn oo kale oo loo qoondeeyay lala xiriirayo , iyo in dhammaan macalimiinta, maamulayaasha loo tababaro nidaamyadan la raacayo.

QARAAR

1. Sarkaal kasta oo ka socda Laanta Socdaalka(ICE) oo isku dayaya in uu galo dhisme ay leeyihiin Dugsiyada Dadweynaha Portland waa in uu marka hore, si shakhsi ahaana, u ogaysiiyaa Guddoomiyaha Waxbarashada Degmada iyo Qareenka Sare ee Degmadda, ujeedada uu leeyahay, waqti ku filana lagu soo wargeliyaa Guddoomiyaha Waxbarashada iyo Qareenka Sare si ay u qaadi karaan tallaabooyin ardaydeeda iyo shaqaalaheeda lagu siinayo badbaado dhanka niyada iyo jirka ah.

2. Guddoomiyaha Waxbarashada iyo/ama Qareenka Sare waxaa la siiyay oggolaansho rasmi ah oo ay wakiilka Laanta Socdaalka(ICE) ku waydiinayaan aqoonsigiisa, ay ku waydiinayaan sababta uu isagu ama iyadu u codsanayo/codsanayso in uu galo/ay gasha, iyo sharcinimada codsigiisa/codsigeeda.

3. Saraakiisha Laanta Socdaalka(ICE) waa in ay keenaan awood ammar lagu bixinayo oo qoraal ah oo ka socda ICE oo tilmaamaya in ay galaan dhisme ay leedahay Degmaddu iyo waxa ay tahay ujeedadu.

4. Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland ma weydiin doonaan xaaladda socdaal/deganaansho ee ardayga ama ta xubnaha ka tirsan qoyska ardayga, iyadoo la raacayo Xeerka Xuquuqda iyo Gaar ahaanshaha Waxbarashada Qoyska (FERPA) iyo sharciga soo raaca, ma bixin doonaan, iyagoo oggolaansho ka haysta waalidka maahane, iyadoo aanan la bixin doonin xaaladda socdaal/deganaansho ee arday kasta oo ka tirsan PPS ama macluumaadka shakhsiyeed.

5. 90-ka maalmood ee soo socda gudahiisa Guddoomiyaha Waxbarashada waa in uu dejiyaa qorshe lagu tababarayo macalimiinta, maamulayaasha iyo shaqaalaha kale taasi oo ku saabsan sida loogu jawaabayo shaqaalaha ka tirsan Laanta Socdaalka (ICE) ee codsanaya macluumaadka ku saabsan ardayda PPS iyo qoysaska iyo/ama isku dayaya in ay soo galaan dhisme ay leedahay PPS. Qorshaha sidoo kale waa in ay ku jiraan nidaamyada la raacayo oo loogu talagalay in qoysaska lagu ogaysiiyo dadaalada ay wado Laanta Socdaalku(ICE) ee ay ku doonayso in ay ku hesho macluumaad ku saabsan ardayda iyo qoysaska iyo sida loo taageerayo ardayda ay xubnaha ka tirsan qoysaskoodu ay barakaceen iyadoo ay ugu wacan tahay Laanta Socdaalku(ICE). Qorshahan waa in la gaarsiiyaa dhammaan qoysaska PPS isagoo ku qoran dhammaan luqaddaha la taageerayo.